

Dhismaha Nadiifinta wuxuu ka Socdaa goobta Everett Smelter Site

Waxda Cilmiga Deegaanka (Ecology) waxay bilowday in ay carrada wasakhaysan ka qaaddo meel ka mid ah goobta Nadiifinta Everett Smelter. Shaqadaan waxay ahamiyad siisaa labo meel oo ka tirsan goobta nadiifinta, mid ku yaala waqooyi midka kalena wuxuu ku yaal koofurta Broadway (khariidada ku taal bogga 2aad). Shaqada waxay socon doontaa ilaa laga gaaro horaanta Maarso.

Shaqada nadiifinta waxaa sii dheer, in Ecology ay kambiyooni ka qaadi doonto beeraha Magaalada, American Legion Memorial iyo Wiggums Hollow Parks. Natiijadaha ka soo baxa kambiyoonaaha laga qaado beerta waxaa la heli doonaa gu'ga 2013.

Maxaa Dhaca

Nadiifinta:

- Clearcreek, oo ah qandaraaslaha Ecology, wuxuu ku hawlan yahay in uu carrada wasakhaysan ka qaado hantida ku taal Hawthorne Street iyo Balsam Lane.
- Haddii hantidaada loo qabtay ballanka nadiifinta sannadka 2011, waxaa lagu soo diri doonaa telefoon ugu yaraan hal todobaad ka hor inta shaqada aysan ka bilaabanin hantidaada.
- Ecology waxay la kulmi doontaa milkiileyaasha hantida ku qoran shaqada nadiifinta bisha Nofembar sannadka 2012 iyo Disembar 2011.
- Saddax ka mid ah calaamadaha wararka dhismaha ayaa lagu meeleyay goobta nadiifinta 2709 5th Street, 2901 Butler iyo 700 bogga Hawthorne. Ecology waxay xayaysiinta iyo wararka ugu dambeeyo mashruuca gelin doontaa sanduu-qyada calaamadaha.

Qaadidda Kambiyonaha:

- La taliyaha Ecology ayaa khariidad u sameyn doono astaamaha dhulka wuxuuna tilmaami doonaa khadadka danabka ku sugan hantida berta City marka la gaaro maal-maha dambe ee Nofembar 2011.
- Kambiyonaha beerta waxaa la qaadi doontaa Disembar 2011 iyo Janaayo 2012.
- Ecology waxay bilaabi doontaa sameynta khariidadda iyo kambiyoonaaha laga qaado hanti kale marka la gaaro Febraayo 2012.
- Haddii hantidaada ku qoran tahay in laga qaado kambiyooni, waxaad boostada ka heli doontaa warqad iyo heshiiska lagu galo hantida marka la gaaro qaboobahaan. Ecology kama qaadi doonto kambiyooni gurigaada haddii aysan haysanin ogolaashada.
- Natiijadaha ka soo baxa kambiyoonaaha Febraayo 2012 waxaa la heli doonaa Nofembar 2012.

Nadiifinta Everett Smelter Everett, WA

Dhismaha Nadiifinta Ka Socota Everett Goobta Dhalaaliyaha

Nambarka Aqoonsiga Goobta Dhismaha : 2744

Haddii aad u baahan tahay in daabacadaan laguugu siiyo qaab kale, wac soo dhaweynta oo laga helo telefoonka 435-649-7000. Dadka maqalkooda yar yahay, wac telefoonka 711 si aad u heshid Adeegga Gaarsiinta (Relay Service). Dadka qaba itaal darrida hadalka, wac telefoonka 877-833-6341.



Goobta Nadiifinta Everett Smelter, Everett

Si aad u heshid macluumaad badan

Su aalaha Guud iyo ka Qeybgalka Dadweyanaha

Meg Bommarito, Project Coordinator
WA Department of Ecology
Northwest Regional Office
Toxics Cleanup Program
3190 160th Street
Bellevue, WA 98008
Telefoonka: (425) 649-7256 or
Telefoonka gacanta (425) 412-0372
Email: Meg.Bommarito@ecy.wa.gov

Technical or Construction Su aalo :

Frank Reinart, UMaamulaha
Goobta Upland
Telefoonka: (425) 649-7287 ama
(425) 530-5169
E-mail: Frank.Reinart@ecy.wa.gov

Telefoonka Maciiumaadka Deegaanka

(425) 530-5169*
*Nambarkan waxaa la dhageysan doonaa maalin kasta iyo dhamaadka todobaadyada. Isku-duwaha mashruuca ama maamulaha goobta ayaa soo celin telefoon muddo 24 saac gudahooda.

Su aalaha Caafimaadka:


Jim White
Washington Department of Health
Telefoonka:(360) 236-3192 ama
Telefoonka lacag la'aanta
1-877-485-7316
Email: Jim.W.White@doh.wa.gov

Wararka caafimaadka ee ku saabsan sunta macdanta c

<http://www.doh.wa.gov/ehp/oeas/pubs/arsenic.pdf>
iyo macdanta loo yaqaan lead .
<http://www.doh.wa.gov/ehp/Lead/default.htm>

Bogga Internetka Ecology
http://www.ecy.wa.gov/programs/tcp/sites_brochure/asarco/es_main.html
**Nambarka Aqoonsiga Goobta
Dhismaha #2744**

Hawsha Nadiifinta 2011



Furaha
Hantida loo ballamiyay nadiifinta sannadka 2011 =

Hawsha Qaadidda Kambiyoonaha 2011

Furaha
Kambiyoonaha laga qaaday hantida sannadka 2011 =



Wararkii Hore

Dhalaaliyaha Asarco, kaasoo ka hawl geli jiray Everett horaantii 1900, wuxuu si balaaran u sababay sunta macdanta iyo wasakhada macdanta loo yaqaan “lead” ee waqooyi bariga Everett. Wasakhda lagu dhaafay hantida dhalaaliyaha duugga waxaa sii dheer wasakhda ku dagtay meelaha ku wareegsan, taasoo wasakheysa carrada.

Ecology waxay maamushay nadiifinta hantida aad loo wasakheyay laga bilaabo 1999-2007. Sannadkii 2009, Ecology waxay maal gelin ka heshay dacwad lagu dhameeyay heshiis lala gaaray Asarco in ay sii waddo dadaalka nadiifinta.

In aad Qoyskaada ka Badbaadisid Wasakhda

Horay ayaa loo qaaday ama waxaa ku daboolmay dhismooyin ama waddo carrada aadka u wasakhaysan ee goobta Everett Smelter. Hase ahaatee, hanti badan waxaa weli ku haray carrada ku yar sunta macdanta ama “leadka” waxaana dhici karto in ay halis ku noqoto caafimaadka muddo kaddib haddii aadan hoos u dhigin halista kaa soo gaari karta. Ilaa laga dhameeyo nadiifinta, Ecology waxay ku talliney in aad qaadiid talaabadaha (sanduuqa hoose) si aad qoyskaada uga badbaadisid wasakhda laga yaabo in ay ku jirto hantidaada.

Ku dhaqaaq talaabadahaan si aad qoyskaada uga badbaadisid wasakhda carrada!



Si wanaagsan u dhaq gacmahaada ka hor inta aadan cunin iyo shaqada kaddib ama kaddib marka aad ku cayaartid carrada. Adeegso buraashka xaaqinka si aad wasakhda uga nadiifisid cidiyahaada.




Xaaq, qooy boorka kaddibna in badan mari fakumka si aad uga qaadiid wasakhda ka soo gashay dibadda.



Dhaq furutada iyo khudaarta ka baxda guriga ka hor inta aadan cunin si aad uga nadiifisid carrada laga yaabo in ay ka saaran tahay korka. Khudaarta waa in aad ku beertid carro nadiif ay iyo meelo kor u kacsan.



Waxaad kabahaada ku dhaaftaa albaabka ama dibadda si aadan gudaha u soo gelinin wasakhda.



Ka taxadir haddii aad ku shaqeyneysid carro. Qaado gacan gashedka iyo si gaar ah u dhaq dharka wasakheysan.



Nadiifi xoolaha lagu haysto guryaha. Ka qaad wasakhda iyo dhooqada dheeraadka ah ka hor inta xoolaha aan la soo gelinin gudaha. In badan buraash una qabey xoolaha guriga lagu haysto. Sariir u gaar seexi xoolaha lagu haysto guriga.

Xaggee laga helaa macluumaad badan? Ecology waxay rabtaa in aad xogogaal ahaatid! Waxaa jira dhowr siyaabo oo lagu helo warar badan oo ku saabsan sida mashruuca u socdo:

- ⇒ Booqo bogga internetka Ecology (bogga hore) ee laga helo bogga wararkii ugu dambeyay.
- ⇒ Soo mar Xarunta Bulshada Baker (Baker Community Center) saacadaha xafiiska (Talaado 9 subaxnimo – duhurnimada iyo Qamiista 1-4 galabnimada).
- ⇒ Booqo calaamadaha goobta, halkaas oo lagu soo dhajin doono todobaad kasta. Calaamadaha waxaa laga helaa 2901 Butler, 2709 5th St. iyo bogga 700 ee Hawthorne.
- ⇒ Naga soo wac khadka wararka ee laga helo telefoonka (425) 530-5169 (nambarka Everett ee deegaanka).